

DIYAAR NOQO HADANA CODEE. WAXA AY U FUDUDAHAY SIDA 123.

Sanadkani waa sanad doorasho – oo aad ka heleyso fursad si aad u doorato qofka xukumaya wadanka iyo qaabka iyo nidaamka codeynta oo aan u isticmaalayno si aan u doorano baarlamaanka mustaqbalka. Codeyntu way fududdahay. Raac saddexdan qodob.



IS DIIWAAN GELI HADDA SI AAD U CODEYSO!

WAA IN AAD IS DIIWAAN GELISAA HADDII AAD:

- Tahay muwaadin New Zealand ama deganaasho ebid ah aad haysato; iyo
- Aad jirto 18 ama aad ka weyntahay; iyo
- Aad ku nooleyd New Zealand si toos ah ugu yaraan hal sano.

DIIWAAN GELINTU WAY FUDUDAHAY. BUUXI FOOMKA DIIWAAN GELINTA. HADA MID HEL ADIGOO:

- Bilaash ugu diraya magacaada iyo cinwaankaaga 3676
- Booqanaya www.elections.org.nz ama www.ivotenz.org.nz
- Bilaash ku wacaya 0800 36 76 56
- Booqanaya mid ka mid ah dukaamada boostada ah

Ha deynin ilaa daqiiqada ugu danbeysa. Hada is diiwaangeli waxayna fududeynaysaa codeynta marka ay imaato maalinta doorashada.

Hadii aad u guurto guri waxa aad u baahantahay in aad cusbooneysiiso cadaymaha diiwangelintaada adigoo mar labaad is diiwangelinaaya.



CODEYNTU WAY FUDUDAHAY

HOREY U QAADO KAARKA FUDUD EE CODEYNTA MARKA AAD CODEYNAYSO WAXA AY FUDUDAYNAYSAA CODEYNTA.

Waxa aad heleysaa kaarka fudud ee codeynta iyo macluumaad ayadoo dib laguugu soo diraaayo iimaylkaaga hadii aad diiwangelisey wakhtigii lo baahnaa (hal bil ka hor doorashada).

Hadii aadan haysan kaarka fudud ee codeynta wali waad codeyn kartaa.

Maalinta doorashada, waxaa jiri doona goobo lagu codeeyo meel adiga kuu dhow.

Waad codayn kartaa ka hor maalinta codaynta, hadii aadan aadi karin goobta codeynta ee deegaankaaga maalintaa.

SHAQAALAHA DOORASHADA WAXA AY U JOOGAAN CAAWIN HADII AAD U BAAHATO WAAD U QADI KARTAA SAAXIB AMA QOF ADIGA XIRIIR KULA LEH.



MARKA AAD CODAYSO

SANADKAN WAXAA JIRA AFTI KU AADAN NIDAAMKA CODEYNTA IYO SI LAMID AH DOORASHADA.

Marka aad codeynaysid waxaad helaysaa labbo warqadood oo ah kuwa codeynta;

1. Waraaqda codbixinta doorashada guud ee midabka oranjiga – In aad ugu codaysid xisbiga iyo qofka deegaanka aad adiga rabtid si uu kuugu matala baarlamaanka

2. Waraaq daada codbixinta aftida ee midabka buluuga madow – waxaa kadhilhi kartaa aragtidaada nidaamka codbixinta oo aan u isticmaalno doorashada xildhibaanada mustaqbalka. Waxaa lagu waydiinayaa:

- haddii aad rabtid in MMP uu jiro ama loo bedelo nidaam kale oo doorasho; iyo
- kan aad ka doorbidaysid Afarta nidaam ee codbixinta oo hadii New Zealand ay go'aansato in ay ku bedelato MMP.

MA RABTAA WAR DHEERI AH?

- Taleefon bilaash ah 0800 36 76 56
- www.elections.org.nz
- www.ivotenz.org.nz

Faafi kalmada. Ku war geli saaxiibadaada iyo qoyskaaga sida ay u fududahay codbixinta iyo is-diiwaan gelinta. Codaynta iyo xog diiwaangelinta luuqado kale booqo bogga www.elections.org.nz